

Nuxurka oo kooban

Hiigsiga cusub ee Soomaaliya

Lafaguris madax bannaan oo lagu sameeyey Heshiiska Soomaaliya, 2014-2016

Marcus Manuel, Alastair McKechnie, Gregory Wilson iyo Rima das Pradhan-Blach

Abriil 2017

Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Cilmi-baaristeennu waxaa ay muujisey sagaal arrimood oo uga soo baxay waayo-aragnimada heshiisyada ee laga heley dalalka kale ee colaadda ka soo baxay, waana sidan: (i) heshiisku waa in uu u habboonaadaa xaaladda dalka; (ii) lahaanshaha iyo ka-qaybgalka dalka ee nakh-shadeynta heshiiska waxaa ay kordhisaa fursadda uu heshiisku ku guuleysan karo; (iii) kartida heer qaran, heerka ka hooseeya qaranka iyo kan caalamiga ah ay u leeyihin maareynta iyo hirgelintu waa in la dhexgeliyaa nak-shadeynta heshiiska; (iv) heshiisyadu waxaa ay u baahan yihiin in ay fahmaan ayna taageeraan hoggaanka; sharci-dejinta iyo meelaha kale ee awooddu ay taallo; (v) mudnaan-siin iyo diirad-saarid isu-dheellitireysa himilada la hiigsanayo iyo sida loo xaqiijin karo ayaa muhiim ah; (vi) ballanqaadyada iyo cabbiraadaha guusha ee heshiisku waa in ay ahaadaan kuwo si gaar ah loo cayimey, la taaban karo, la korjoogteyn karo oo dheellitiran; (vii) wada-xisaabtanku waa in uu noqdaa mid labada dhinacba ay wada xisaabtamaan; (viii) waa in lagu daraa tallaabooyin gaar ah iyo taageero lagu xoojinayo taabogalnimada hay'adaha dowladda, iyada oo diiradda la saarayo dadaal ku aaddan in meelaha mudnaanta lagu siiyey hehiiska la waafajiyo qorsheyaasha dowladda ee la ansaxiyey; iyo (ix) in kasta oo heshiisyadu ay badanaa sii wanaajiyaan isuduwidda, haddana tani waxaa ka dhalan karta in uu kharash badan ku baxo (*transaction cost)*.

Waayo-aragnimada dalalka kale ayaa caddeyneysa in Heshiiska Soomaaliya uu ahaa mid wanaagsan oo ku dhex shaqeeyey xaalad aad u culus. Qaar badan oo ka mid ah waxyaabaha guusha dhaliya, marka loo eego casharradii laga bartey dalalka kale, kama jirin dalka. Baaxadda iyo waqtiyada Heshiisku waxaa ay ahaayeen kuwo hami badan ku dhisan. Culeysyada amniga ayaa xakameeyey joogitaanka La-hawlgalayaasha Horumarinta ee Muqdisho. Tan waxaa weheliyey in is-beddellada siyaasadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanadihii u horreeyey, ay carqaladeeyeen dadaalladii lagu dhisayey xiriirro wada-shaqeyn oo taabogal ah. Sababo badan daraaddood, waxaa cad in ay jireen is-faham-darro, halka filashooyin labada dhinacba ay kala qabeen aaney xaqiiqo ku dhisneyn.

Xaaladda noocan ah marka ay jirto, jahawareer iyo guuldarrooyin la xiriira Heshiiska ayaan ahayn kuwo lala yaabo. Marka lagu xisaabtamo xaaladda jirtey, waxaa cajiib ah in Heshiisku shaqeeyey iyo in uu inta badan ahaa mid la soo dhoweeyey. Qof kasta oo wax laga weydiiyey ayaa si cad u sheegey in xaaladda hadda jirta ay ka wanaagsan tahay tii hore iyo in jiritaan la'aanta heshiisku ay ka sii xumaan lahayd. Qaar badan ayaa sidoo kale xusey in horumarka uu gaarey Heshiisku uu xawaare badnaa muddadii u dambeysey ee ilaa sanad iyo wax la jira ahayd.

Dhinaca 12-da su'aalood ee gaarka ah ee loo dejiyey dib-u-eegista ayaa natiijo muuqata waxaa ay tahay in ay ku kala fikrad duwan yihiin Dpwladda Federaalka Soomaaliya iyo La-hawlgalyaasha Horumarinta. Warbixintan ayaa fikradahan la kala qabey oo ilaa xad faahfaahsan (laakiin cidda fikirka bixisey aan la carra-baabin) waxaa ay ku diyaarisey documenti kale, "Nuxurka la-tashiga Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, La-hawlgalayaasha Horumarinta iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah'. Fikradahan la soo koobey ee ay kala qabeen hawl-wadeennada hadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo La-hawlglayaasha Horumarinta ayaa la doonayaa in ay noqdaan dokumenti tixraac ah oo wanaagsan oo loo adeegsado go'aamada iyo doodaha mustaqbalka ee ku saabsan Heshiis Wada-hawlgal cusub. Fikirradaha daneeyeyaasha kala duwan ayaa sidoo kale ku kala duwanaa Qorshaha Gaarka ah ee Somaliland (*Somaliland Special Arrangment – SSA)*. Tilmaamaha Tixraaca shaqada ee dib-u-eegistan ayaa lagu codsadey in daraaseyn lagu sameeyo SSA. Fikirradaha kala duwan ee ay qabeen daneeyeyaasha kala duwan, iyo waxa uga baxay kooxda dib-u-eegista, ayaa sidoo kale lagu qorey dokumenti kale.

Guulaha muhiimka ah ee heshiiska waxaa ka mid ah hab iskudhafan (shaamil ah) oo la adeegsadey, in la isku dayey in si buuxda looga shaqeeyo dhammaan shanta yool ee nabad-dhisidda iyo qaran-dhisidda. Dhinaca u-dhammaanshaha qaab-dhismeedka cusub waxaa uu si weyn ugu guuleystey wax-u-qabashada Dowlad-goboleedyada soo-ifbaxaya. Heshiisku waxaa uu gacan ka geystey dhisidda kalsoonida. Waxaa uu bixiyey qaab guud oo cad oo daahfuran oo waxtarna leh oo ay u wada xisaabtamaan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo La-hawlgalyaasha Horumarinta iyo shuruudaha asaasiga ah ee wadahadal kasta oo guuleysan kara oo ay yeeshaan Dowlad & La-hawlgale Horumarineed. Waxaa jirey horumar cad oo laga gaarey qaar badan oo ka mid ah mabaa'diida *FOCUS* iyo *TRUST* ee Hiigsiga Cusub, iyada oo meelaha qaarna, horumarkan waxaa uu ahaa mid cajiib ah. La-hawlgalayaal Horumarin oo badan ayaa xusey in Heshiisku uu yahay cunsur muhiim ah oo raad ku yeesha go'aamadooda ay ku joogteynayaan maaliyado horumarin oo badan oo muddada fog ku wajahan. Wadarta gargaarka imanaya dalka ayaa durba aad uga badan tiradii warbaahinta soo jiidatey ee looga dhawaaqey shirkiii Brussels ee Soomaaliya. Heshiiska ayaa sidoo kale u muuqda in uu door ka ciyaarey dib-ula-shaqeynta Hay'adaha Caalamiga ah ee Maaliyadda, iyo bilaabidda geeddi-socodka lagu helo deyn-cafinta. Tas-hiilaadka Horumarinta iyo Dib-u-heshiisiinta Soomaaliya (SDRF) ayaa noqonaya hannaan cusub oo maaliyad-siin, inkasta oo deeq-bixiyeyaashu aaney u adeegsanneynin si buuxda.

Culeysyada Heshiiska waxaa ka mid ah welwel laga qabo taabogalnimadiisa iyo horumarka laga gaarey qaar badan oo ka mid ah cabbiraadaha guusha. Dadaallada hawlaha bani'aadamnimada iyo horumarinta ayaa loo baahan yihiin in ay noqdaan kuwo isula jaanqaadaya si ka wanaagsan sida hadda. Geeddi-socodyada wada-hadalka Heshiiska ayaa loo arkaa in ay yihiin culeys saa'id ah iyo in ay ku guul-darreysteen in ay bixiyaan madal si buuxda loogula shaqeyn karo Soomaalida. Dhinaca kalese, hay'ado badan oo isuduwid oo is-barbaryaacaya ayaa halis gelinaya hufnaanta iyo taabogalnimada. Waxaa gaabis ku socdey horumarka

laga gaarayey wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah ee maamulka maaliyadda sida Maareynta Maaliyadda Dowladda / *Public Financial Management* (PFM), musuqmaasuqa iyo arrinta muhiimka ah ee kordhinta dakhliga gudaha. Gargaarka dalka soo galaya ayaa u muuqda in uu ku istaagey heerarkii uu joogey 2013/2014 waxaana la filayaa in uu xoogaa soo yaraado mustaqbalka. Marka la eego inta qofka kaga soo aadeysa waxaa uu waxyar ka hooseyn doonaa dalalka kale ee colaadda ka soo baxaya. Isticmaalka La-hawlgalayaasha Horumarinta ee nidaamyada dowladda ayaa weli aad u xaddidan. Geeddi-socodka bixinta daymaha daahey (*arrears*) ayaa ahaa mid aad u gaabinaya. Ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah ayaa si aad u yar uga qaybgelayey Heshiiska. In kasta oo arrinta Dheddigga-labka (Jinsigu) ay tahay mid ka mid ah afarta arrimood ee meel walba ka taabanaya Heshiiska haddana caddeynta loo hayo in raad weyn ay arrintan ku yeelatey ayaa marka ugu wanaagsan tahay ah mid aan la isku halleyn karin. Waxaa la dhihi karaa in kobcinta kartiduna ay sidaas oo kale tahay. Nasiib-darrose, Heshiiska ayaa noqdey mid ay dadku ka welwelsan yihiin in uusan wax wanaag ah u soo kordhin nolosha dadka caadiga ah. Haseyeeshee, SDRF ayaa mar dhow un bilowdey in ay si ballaaran u shaqeyso oo mana caddeyn ilaa heerka ay labada dhinac ka go'an tahay in ay raacaan qaabka guud ee wada-xisaabtanka.

Casharrro badan ayaa u dhow kuwii laga bartey dalalka kale. Xaaladdu waa mid muhiim ah: in horumar laga gaaro ayaa aad u adag marka aanu jirin amni aasaasi ah iyo xasilooni siyaasadeed. Heshiisyada ayaa badanaa sii wanaajiya isuduwidda laakiin kharash badan ayaa hawlahooda ku baxa waxaana gaabis ku socda is-waafajinta siyaasadaha hawl-wadeennada horumarinta, bani'aadamnimada, amniga iyo siyaasadda. Guusha laga gaaro mid ka mid ah arrimahan ayaan la sii joogteyn karin haddii aan guul laga gaarin kuwa kale. Soomaaliya in waqti dheer lagu bixiyo diyaar-garowga ayaa bixin lahayd fursad lagu wanaajiyo in Heshiisku loo arko in uu leeyahay dalka iyo in si ballaaran looga qaybgalo. Liis ka yar kan hadda oo ah arrimaha mudnaanta leh ee lagu heshiiyey iyo waqtiyo ka gaaban kuwa hadda, oo diiradda saaraya arrimaha sida ugu weyn looga welwelsan yahay iyo xiriirrada dhexdooda ka dhexeeya, ayaa laga yaabaa in ay kordhin lahayd haboonaanshaha iyo taabogalnimada Heshiiska.

Casharka ugu weyn ee laga bartey, in kasta oo ay xaaladdu si weyn u cusleyd, waa in Heshiiska Soomaaliya ay caddaatey in uu waxtar leeyahay iyo in dhammaan dhinacyadu ay diyaar u yihiin in ay yeeshaan nooc un Heshiis Wada-shaqeyn ah. Heerka aasaasiga ah ayaa Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) waxaa si fudud loo dhexgelin karaa tiro Mabaa'dii Wada-hawlgal ah iyo/ama liis ay ku qoran yihiin arrimo loo wada arkey in ay mudnaan leeyihiin Waxaa markaa daliil wanaagsan loo hayaa Qaab Guud oo Wada-xisaabtan / *Mutual Accountability Framework (MAF),* oo ah dokumenti ballaaran oo heerkiisu sarreeyo oo ay ku wada heshiiyaan Dowladda iyo La-hawlgalayaasha Horumarinta. Heshiiska laftiisa ayaa haddaba bixinaya ajande wanaagsan waxaana daraaseynta warbixintan ee toban iyo labada su'aalood ee dib-u-eegistan ay gacan ka siin doonto Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo La-hawlgalayaasha Horumarintu waxa diiradda la saarayo mustaqbalka. Mid ka mid ah culeysyada ugu weyn, marka loo eego waayo-aragnmada laga heley dalal kale, ayaa noqonaya hubinta in Qaabka Guud ee Wada-xisaabtanku (MAF) uu si habboon isugu dheellitirayo Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo La-hawlgalayaasha Horumarinta.

Su'aal jirta ayaa ah in la sii dhaafayo laga sii gudbayo Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) iyo Mabaa'diida Wada-hawlgalka. Markii ay kooxdu soo akhriyeen caddeynta laga heley dalalka kale – iyo waayo-aragnimada lagu heley Soomaaliya gudaheeda – ayaa ah **in daliil xooggan loo hayo in qaab guud oo heerkiisu sarreeyo oo kale la yeesho**, inkasta oo uu culeyskiisu leeyahay. In si guul leh ay Soomaaliya uga gudubto nugeylka oo ay ugu gududbo adkeysiga uma baahna keliya horumar, waxaa sidoo kale u baahan tahay hab iskudhafan, isla-socda oo la isuduwey oo ay wada yeeshaan dhammaan bulshooyinka siyaasadda. Qaabka guud ee noocaan ah ayaa loo baahan yahay in uu noqdo mid ay Soomaalidu leeyihiin. Waxaa ay tani sameynteeda dad ku qaadaneysaa waqti, laakiin ugu yaraan in la hubiyo helidda lahaanshaha Dowlad-goboleedyada, Sharci-dejinta iyo sida wanaagsan, bulshada rayidka ah iyo hoggaamiye-dhaqameedyada ayaa loo baahan yahay.

Kooxdu waxaa ay sidoo kale xustey afar meelood oo muhiiim ah Heshiis(yo) Wada-hawlgal oo kasta oo cusub:

1. **In si ka xooggan sida hadda diiradda loo saaro arrimaha ganacsiga gaarka loo leeyahay**; gaar ahaan, heshiis suuragal ay tahay in lala galo ganacsiga gaarka loo leeyahay oo Soomaaliya awood u siiya in ay ka badbaaddo aragtida loo yaqaanno *low-level equilibrium trap* oo Dowladddu aanu soo geli dakhlin ku filan maaddaama ay hooseeyso cashuurta la qaadi karo oo aaney dowladdu bixin karin adeegyo waxtar leh sida kaabayaasha.
2. **In diiradda mar kale la saaro hubinta in dhammaan dadaalladu ay ahaadaan kuwo mideysan oo isla-jaanqaadaya;** gaar ahaan dadaallada hawlaha bani'aadamnimada iyo horumarinta, amniga iyo ku shaqeynta guud ahaan tiirarka Qorshaha Horumarinta Qaranka
3. **Horumar degdeg ah oo laga gaaro arrimaha maaliyaddda iyo maamulka dowladeed;** gaar ahaan sii wanaajinta isla-jaanqaadidda iyo isuduwidda PFM, la-dagaallanka musuqmaasuqa, kala-mudnaansiinta guud ahaan ilaha maaliyadda iyo in lagu heshiiyo khariidad waddo oo lagu bixinayo deymihii baaqdey iyo cafinta deymaha. Arrinta ugu dambeysa ayaa muhiim u ah kordhinta maaliyad-dibadeed oo lagu maalgeliyo kaabayaasha dhaqaalaha ee waaweyn. Si looga fogaado in la abuuro rajo-been ah waa in ay caddaataa lacagta dheeriga ah ee loo heli karo in lagu isticmaalo Soomaaliya
4. **Geeddi-socod wadatashi oo la sii wanaajiyo** si loo hubiyo in si habboon la isugu dheellitiro kooxaha wadatashiga ee ballaaran, oo ay taageerto maalgelin aad uga ballaaran oo lagu bixiyo tarjumidda dokumentiyada iyo kooxo ka yaryar oo macluumaad joogto ah oo daacadnimo ku dheehan tahay isweydaarsada. Waayo-aragnimada laga heley dalalka kale ayaa ah in inkasta oo uu culeyskiisa leeyahay wadatashigu waxaa uu muhiim u yahay in guul la gaaro. Wadatashiyo ka wanaagsan kuwa hadda ayaa la sii wanaajin doonaa iyada oo loo marayo nidaamyo korjoogteyn iyo qiimeyn oo adag. Arrintan ayaa sidoo kale muhiim u ah in si taabogal ah loola shaqeeyo bulshada rayidka ee Soomaaliyeed.

ODI waa kan ugu horreeya macaahidda madax-bannaan ee dalka UK ee dhinaca cilmi-baarista horumarinta caalamiga ah iyo arrimaha bani'aadamnimada

Akhristayaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay dib u soo saaraan agabka ku jira Warbixinnada ODI si ay qayb uga noqdaan waxyaabaha ay daabacayaan, waase haddii aan ganacsi ahaan loo iibineyn. Maaddaama uu leeyahay xuquuqda lahaanshaha, ODI waxaa uu codsanayaa in si habboon loogu mahadceliyo iyo nuqul ka mid ah daabacaadda. Haddii agabka lagu isticmaalo internet-ka, waxaan akhristayaasha ka codsaneynaa in ay ku guntaan qoraalka asalka ah ee ku jira barta *internet*-ka ee ODI. Fikradaha ku jira qoraalkan waa kuwa qoraaga oo khasab ma aha in ay ka tarjumaan fikirka ODI.
© Overseas Development Institute 2017. Hawshan waxaa rukhsadda la siiyey ay waafaqsan tahay *Creative Commons Attribution-Non Commercial Licence* (CC BY-NC 4.0).

Dhammaan Warbixinnada ODI waxaa laga heli karaa www.odi.org

Sawirka Jeldiga kore: Gabar Soomaaliyeed oo waddada socota xilli qorrax-dhac ah oo joogta Xero Barakacayaal oo ku taalla meel u dhow magaalada Jowhar, Disembar 14. Dagaallo u dhexeeya qabaa'ilka ayaa dad ka badan toban iyo laba kun oo qof ku barokiciyey meel u dhow magaalada Jowhar, Soomaaliya. Qaar badan oo ka mid ah ayaa hoy ku-meelgaar ah ka dhigtey meel u dhow xero mileteri oo ay deggan yihiin ciidamada Midowga Afrika oo degaanka ku taalla, ciidamadaas oo hadda ilaaliya amniga barokacayaaasha. Sawir-qaade: AU UN IST PHOTO / Tobin Jones.

Overseas Development Institute
203 Blackfriars Road
London SE1 8NJ
Tel +44 (0) 20 7922 0300
Fax +44 (0) 20 7922 0399

odi.org